# Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah

Maarso 2025

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.

## Adeegyada Laga Heli Karo Barnaamijyada Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah

Shaxda hoose waxa ku lista gareysan adeegyada laga heli karo Barnaamijyada Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah ee Nebraska.

Sharaxaad gaaban oo barnaamij kasta ah ayaa ku qoran xagga dambe ee dukumeentigan. Barnaamij kastaa wuxuu leeyahay shuruudihiisa u-qalmitaanka u gaarka ah. Si aad wax badan u barato ama u codsato, booqo https://dhhs.ne.gov/Pages/Special-Health-Care-Needs.aspx.

| Adeegyada La heli karo | DCP | DPFS | Nasinta Cimriga | MHCP/ GHPP |
|---|---|---|---|---|
| Qalabka caawaiya dadka curyanka ah, xanuunsan ama da'da ah (iibsiga ama kiraynta) | - | ✓ | - | ✓ |
| La-talin la xiriirto naafanimada ama Tabarka | - | ✓ | - | - |
| Rugaha Adeegga La Xiriira Naafanimada | - | - | - | ✓ |
| Dayactirka Qalabka | - | ✓ | - | - |
| Dayac tirka Dhismaha Guriga | ✓ | ✓ | - | - |
| Mareynta guriga | - | ✓ | - | - |
| Lacag celinta Qofka Lo samayo Marku Xalada Caafimaad U aado meel kale | ✓ | - | - | - |
| Lacag celinta Masaafada loo jaray rugta Caafimaadka | ✓ | ✓ | - | - |
| Caafimaadka, Qalliinka, Daaweynta, Baadhista, iyo Adeegyada kale ee Caafimaadka (la xiriira naafanimada ama naafanimada) | - | ✓ | - | ✓ |
| Daawaynta iyo Alaabta Lacag celintooda | - | ✓ | - | - |
| Maaraynta daawada | - | ✓ | - | - |
| Kaalmada Daryeelka Shakhsi ahaaneed | - | ✓ | - | - |
| Nasinta (daryeelaha aan mushaharka la siin) | ✓ | - | ✓ | - |
| Waxka bedelka Gaadiidka | ✓ | ✓ | - | - |

## Barnaamijka Carruurta Naafada ah (DCP)

Waxay u adeegaan carruurta naafada ah iyagoo ka caawinaya inay Ka bixiyaan adeegyada iyo taageerada aan caafimaadka ahayn. Adeegyada waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo lagu salaynayo qiimeynta baahiyaha waxaana lagu muujiyay qorshe wadajir ah oo qoyska lala sameeyay.

Si aad ugu qalanto barnaamijkan, cunuggu waa in uu ka yar yahay 16 sano, degane Nebraska, haysta heerka SSI ee mushaharka hadda, ama in uu guriga kula nool yahay qoyskiisa. Barnaamijkani uma baahna u-qalmitaanka Medicaid.

## Dadka Naafada ah iyo Taageerada Qoyska

Waxay caawiyaan dadka da' kasta leh ee caafimaad ahaan lagu go'aamin karo mid daran, naafo aan dhamad laheeyn oo uu sheegay xirfadle caafimaad oo sharciyeysan. Barnaamijka waxaa loogu talagalay in lagu dhiirigeliyo ilaalinta xubinta qoyska, lagu ilaaliyo xaaladaha nololeed ee madaxbannaan ilaa heerka ugu sarreeya ee madaxbannaanida, iyo in dadka waaweyn ee naafada ah ay sii shaqeeyan ama la shaqaaleyo.

Codsadayaasha la xaqiijiyay in aay o qalmaan waxay heli karaan maalgelinta adeegyada la oggol yahay ilaa $400 bishii ama $4,800 sannadkii.

Barnaamijkani uma baahna u-qalmitaanka Medicaid. Barnaamijkani ma'aha nuqul ka mid ah adeegyada barnaamijyada kale ee uu qofku qaadanayo ama laga yaabo inuu u qalmo. Barnaamijku waxa uu noqon karaa mid kaabis u ah bixinta maalgelinta adeegyada la oggol yahay ee laga yaabo in aanay si buuxda u daboolin barnaamijyada kale.

## Barnaamijka Dadka Hidde ahaan Naafada ah (GHPP)

Waxay siisaa adeegyo caafimaad oo gaar ah, oo loogu talagalay dadka da'doodu tahay 21 iyo wixii ka weyn, ee laga helay xanuunka caabuqa ee sambabada, Xanuunka dhiig baxa, iyo/ama cudurka Sickle cell.

Barnaamijkani uma baahna u-qalmitaanka Medicaid.

## Respanspite nolosha

Loogu talagalay in lagu nasiiyo daryeelayasha dalabaadka bixinta daryeelka joogtada ah ee qaataha baahiyaha gaarka ah ee aan awoodin in ay is daryeelaan. Waxay siisa maalgelinta daryeel bixiyayaasha qoyska aasaasiga ah ee aan mushaharka lahayn si ay u iibsadaan adeegyada nasinta.

Si uu ugu qalmo, daryeel bixiyaha waa inuu:

1. In aad siisa daryeel ama ilaalin codsadaha ama qaataha baahiyo gaar leha iyada oo aan lacag celin ama lacag bixin;
2. U baahan adeegyo nasasho;
3. Ku noolow isla guriga qofka baahiyaha gaarka ah qaba ama aad daryeel ku siisa qofka gurigiisa ugu yaraan 4 saacadood maalintii Axadda ilaa Sabtida; ama
4. Ha isticmaalin adeegyada nasinta markaad ku hawlan tahay hawlaha shaqada.

Barnaamijkani uma baahna u-qalmitaanka Medicaid. Barnaamijkani ma'aha nuqul ka mid ah adeegyada barnaamijyada kale ee uu qofku qaadanayo ama laga yaabo inuu u qalmo.

## Barnaamijka Carruurta Caafimaad ahaan Naafada o ah (MHCP)

Waxay siisaa adeegyo caafimaad oo gaar ah carruurta iyo dhalinyarada leh baahiyaha daryeel caafimaad ee gaarka ah. Adeegyada waxaa ka mid ah isuduwidda adeegga/maamulida kiis, qiimaynta takhasuska kooxda caafimaadka, helitaanka takhaatiirta takhasuska leh, iyo kabixinta adeegyada caafimaadka ee idman.

Si aad ugu qalanto barnaamijkan, qofku waa inuu da'diisu ka yar tahay 21 jir, degane Nebraska ah, iyo in uu qabo xaalad caafimad o daba dheerad leh iyo in uu qofka oo firfircoonada qorshaha daaweynta. Barnaamijkani uma baahna u-qalmitaanka Medicaid.